

CWM Plus: Faa'iidooyinka buuxa ee Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) inta uurka la leeyahay



Caafimaadka ee Muwaadinka Laga Saamaxay ee Plus (CWM Plus) waxay bixisaa daryeel loogu talagalay xubnaha uurka leh ee ka tirsan CWM, ama “caafimaadka degdega ah.”

Dadka waaweyn ee uurka leh qaarkood ee aan buuxinayn shuruudaha looga baahan yahay muwaadinimada waxaa dhici karta in ay leeyihiin faa'iidooyinka CWM Plus. Faa'iidooyinka CWM Plus:

- Waxay daboolaan daryeelka inta uurka la leeyahay
- Waxay bixiyaan daryeelka iyo dhalashada ilmaha (ka dib daryeelka uurka) 60 maalmood dhalashada ka dib ama marka uurku dhamaado.
- Waxay daboolaan booqashooyinka dhakhtarka, daryeelka degdega ah, ilkaha, aragga, iyo kuwo badan

Waxaa dhici karta in aad leedahay CWM Plus haddii aad uur leedahay oo:

- Ku nooshahay Oregon,
- Tahay 26-54 sano jir,
- Buuxinayso shuruudaha dakhliga u yaala iyo waxyaalaha kale oo la iskaga baahan yahay, oo
- U qalanto Caafimaadka ee Muwaadinka Laga Saamaxay (CWM)

Waxaad leedahay CWM Plus haddii:

- Ogeysiintaada U qalmida Caafimaadka oranayso “CWM Plus” qaybta “Approved Benefit” ee bogga 2 dhexdeeda.
- [Warqadaada soo dhaweynta ah ee OHP](#) ay leedahay erayga “CWM Plus” ee ku xiga magacaaga ku qoran bogga 2.

Faa'iidooyinka CWM Plus

CWM Plus wuxuu la mid yahay OHP buuxa (OHP Plus). CWM Plus wuxuu bixiyaa adeegyadani iyo kuwo badan:

Waxaad heli kartaa tani oo ku qoran luqad kale, far waaweyn, ama hab kale oo adiga kuu fiican.

Wac 800-699-9075 (TTY 711).

Daryeelka inta lagu jiro ama ka dib uur lahaanshaha:

- Adeegyada dhalashada ilmaha ee la qorsheeyay
- Daryeelka doula. [Ogow waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan adeegyada doula.](#)
- Adeegyada qorshaynta qoyska (sida xakamaynta dhalmada)
- Adeegyada caafimaadka galmada (sida baaritaanka STI)
- Waxyaabaha nafaqo ahaanta loo isticmaalo (sida fiitamiinada dhalashada ilmaha ka hor
- Iska soo saarista ilmaha

Dhakhtarka iyo daryeelka degdega ah:

- Booqashooyinka dhakhtarka
- Baaritaano iyo daaweynta loogu talagalay caafimaadkaaga
- Daryeelka degdega ah ee 24 saacadoodka ah
- Daryeelka isbitaalka

Caafimaadka dhimirka:

- Daaweynta iyo la talinta
- Taageerada isticmaalka tubaakada, aalkolada iyo daroogada

Caafimaadka ilkaha:

- Nadiifinta
- Baaritaannada ilkaha iyo raajatada 'x-rays
- Buuxinta
- Saarida iliga
- Daryeelka ilkaha ee degdega ah ee 24 saacadoodka ah

Daawooyinka la isku qoro:

- Daawada

Daryeelka indhaha:

- Baaritaannada
- Muraayadaha indhaha ama dhalooyinka indhaha la geliyo 'contact lenses'
- Adeegyada kale ee lagu wanaajinayo aragaaga

Noocyada kale ee daryeel:

- Qalabka maqalka kordhiya
- Qalabka caafimaadka
- Daryeelka caafimaadka guriga
- Daaweynta xirfadda la leeyahay

Ma u baahan tahay gaadiid raacis lagu aadayo balanta dhakhtarkaaga? Ka tirsan CWM Plus, waxaad sidoo kale heli kartaa [gaadiid raacis lagu aadayo balamaha daryeelka caafimaad](#).

Ma uur baad leedahay oo ka tirsan tahay CWM (Medicaid degdega ah)?

OHP ka wac 800-699-9075 (TTY 711) si aad u soo sheegto uur lahaanshahaaga. Sidan samee marka aad ogaato in aad uur leedahay ama muddo 60 maalmood guhahood ah ka dib marka uurkaagu dhamaado. CWM Plus waxaa loogu talagalay dadka uurka leh ee ka tirsan CWM.

Uur ma leedahay oo u baahan tahay daryeel caafimaad?

Haddii aadan lahayn caymis caafimaad, codso OHP maanta.

- Waxaad ka codsan kartaa internet-ka [ONE.Oregon.gov](#).
- Dadka bulshada u adeega oo xirfad leh oo gobolka ku baahsan ayaa kaa caawin kara buuxinta arjiga. Waa lacag la'aan. Booqo [OregonHealthCare.gov](#) si aad u hesho dadka bulshada u adeega ee degaankaaga.

Ma haystaa su'aalo ama ma u baahan tahay caawimaad?

Telefoon ahaan:

- **Wixii su'aalo ah ee ku saabsan CWM Plus aad leedahay:** Wac 800-273-0557
- **Wixii su'aalo ah ee ku saabsan codsiga OHP ama si aad u soo sheegto uur lahaanshahaaga:** Wac 800-699-9075

Si shakhsi ah:

- Taageero ka hel dadka bulshada u adeega oo tababaran. Booqo [OregonHealthCare.gov](#) si aad u hesho dadka bulshada u adeega ee degaankaaga.
- Booqo xafiiska Dadka Waayeelka iyo Naafada ah ee ODHS ama Barnaamijyada Isku-Filnaanshaha, ama Hay'ada Dadka Waayeelka ah (AAA). Hore u sii wac ka hor booqashada. [Halkan riix si aad u hesho xafiiskaaga degaanka.](#)

OHP.Oregon.gov